

## Warbixin ku saabsan qaabka loo maamulayo macluumaadka shakhsiga ah ee dadka degan xerada qaxootiga

### **Waa maxay macluumaadkaaga skakhsiga ah ee la isticmaalayo?**

Waraysiga dejinta waxaa ka soo bixi kara macluumaad adiga kugu saabsan, xiriirna la leh dejintaada. Macluumaadkaas shakhsiga ah waxaa ka baaran-degaya hay'ado dowladeed oo Norway ah taasoo la xiriirta dejintaada.<sup>1</sup>

Macluumaadka soo socda ayaan isticmaali doonaa:

- Xaalado gaar oo ay tahay in la tixgeliyo wakhtiga dejinta
- Wakhiyada iyo cinwaanada iyo afkaaga hooyo
- Afka aad doonaysid in la guugu tarjumo

Marka ay dejintaada laga maarmaan u noqoto, waxaa sidoo kale la isticmaali karaa macluumaadka soo socda:

- Qawmiyadda
- Diinta aad rumaynsan tahay oo aad ku xiran tahay
- Dambiyada la galay
- Xaaladda caafimaad
- Xaaladda jinsi sida jahaysnaanta iyo aqoonsiga jinsi

Haddii aan isticmaalayno macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga waxay tahay in aad saxiixdid caddayn ogolaansho. Waxay tusysaa in aad oggolaatay in shaqaalaha caafimaadka ay ka warrami karaan caafimaadkaaga isla markaasna in aan macluumaadkaas isticmaali karno. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaa caawin kara caddayntaan ogolaanshaha.

### **Waa maxay sababta aan u isticmaalayno macluumaadkaaga shakhsiga ah?**

Waxa aan adeegsanaynaa macluumaadkaaga shakhsiga ah si aan sida ugu wanaagsan kuu dejinno ayada oo la fiirinayo baahidaada xagga degaanka iyo xagga tababarka. Macluumaadkaaga shakhsiga ah waxaa loo istecmaalayaa dantaas kaliya. Marka lagu dejinayo waxaa warbixinta caafimaadka la adeegsanayaa oo keliya haddii aad qabtid naafanimo culus iyo/ama dhibaatooyin la xiriira habdhaqanka, ama caqabado kale ee caafimaad oo lagama maarmaan ka dhigaya diyaarinta hoyga.

### **Yaan la qaybsanna macluumaadka shakhsiga ah?**

Waraysiga dejinta kadib waxa ay xerada qaxootiga (oo hoos timaadda UDI) laqaybsan karaysaa macluumaadka shakhsiga ah ee quseeya IMDi, NAV, maamulka gobolka iyo degmada lagu dejinayo. Is-dhaafsiga macluumaadka shakhsiga ahi waxa uu u dhacaa si aamin ah ayadoo la isticmaalayo nidaamka kombuyutarka ku salaysan ee IMDinett, kaasoo ay ku wada xiriiraan IMDi iyo degmooyinka.

Macluumaadka waan tirtiri doonaa ugu dambeen 15 sano kadib taarikhda dejinta.<sup>2</sup>

<sup>1</sup> Tani waxay ku salaysantahay sharciga qaabiliaadda ajnabiga § 25 qaybta 1aad xarafka d iyo xeer-hoosaadyada la socda ee ku saabsan maamulidda macluumaadka shakhsiga ah § 8.

**IMDI** Postboks 8059 Dep. 0031 Oslo | Tollbugata 20, 0031 Oslo | Telefon: 24 16 88 00 | Telefaks: 24 16 88 01  
E-post: post@imdi.no | Organisasjonsnummer: 987 879 696 | www.imdi.no

Mahadsanidin

Hay'adda is-dhexgalka iyo wada-noolaanshaha

---

<sup>2</sup> Fiiri xeer-hoosaadka ku saabsan maamulidda macluumaadka shakhsiga ah oo raacsan xeerka qaabilaadda ajnabiga § 16 qaybta 2aad.